

# S&J Qiyaasaha Kharashaadka Daawaynta Kahor



## Maxaa loola jeedaa Qiyaasta Kharashka Daawaynta Kahor?

Si xubnaha looga caawiyo inay fahmaan kharashaadka kahor inta aysan bixinin, Delta Dental aya bixisa qiyaasaha kharashaadka daawaynta ka hor oo bilaash ah. Qiyaasahani waxay bukaanka ka siiyaan fikrad qiyaas ah inta uu le'eg yahay kharashka daaweynta ilkaha ee guud, iyo sida kharashkaas ugu soo kala aadi doono xubinka iyo Delta Dental. Helitaanka qiyaas daawaynta kahor way sahlan tahay.

## Goorma ayaa lagu talinayaa qiyaas daawaynta kahor?


Qiyaasaha waxaa inta badan loo codsadaa habraacyada qaaliga ah sida ilko buuxinta, soo saarida iliga xigmadda, cawil-celinta ilkaha, ilkaha macmalka ah iyo qalliinka afka.

## Sideen ku heli karaa Qiyaas Daawaynta Kahor?

Tallaabada ugu horeysa waa in dhakhtarkaaga ilkuhu soo gudbiyo qorshe daawayn oo soojeedin ah. Dib ayan u eegi doonaa dokumeentiyadan iyo qorshahaaga dheefta gaarka ah, kadibna jawaab ayaan idin ka siin doonaa adiga iyo dhakhtarkaaga ilkaha qiyaasta kharashka daaweynta.

Qiyaastu waxaa lagu saleeyaa nooca qorshaha aad haysato, u-qalmitaankaaga, dheefaha qorshahaaga ee aad hadda qaadata, iyo qaddarta dheefaha ee ugu badan ee sannadlaha ah. Qiyaasaha waxaa badanaa looga soo jawaab-celiyaa maalmo gudahooda, laakiin daawaynta xaaladaha adag ayaa qaadan karta waqti dheer si loo qiimeeyo.

**Ha la yaabin - weydii dhakhtarkaaga ilkaha inuu codsado Qiyaas Daawaynta Kahor!**



## The Power of Smile™

Xog dheeraad ah ka baro qaabka caafimaadka afkaaguu ugu xiran yahay caafimaadkaaga guud ahaaneed adigoo adeegsanaya:  
[Blog.DeltaDentalMN.org](https://www.blog.deltadentalmn.org)